

# Tilmaamaha Hirgelinta Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca Ah

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Taariikhda Hore: Luuliyo 2026
Qaybta Waxbarashada Hore ee Carruurta (Early Learning Division) | Waxaa loo oggolaaday in la qaybiyo iyadoo uu ansixiyay Diana Stokes, Maamulaha Tayada iyo Helitaanka Adeegyada

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# TUSMADA


Hordhac ..... 3

Ujeedada Tilmaamaha Hirgelinta Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca Ah ..... 3

Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca Ah ..... 3

Noocyada Barnaamijyada U Qalma Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ..... 3

Hay'ado dhowr ah ayaa si wadajir ah uga shaqeeya taageeridda Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah. ..... 4

Qaab-dhismeedka Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ..... 4

Guudmar ..... 4

Bilaabanaya ..... 5

Yaa Codsan Kara Magacaabista? ..... 5

Shuruudaha U-qalmitaanka ..... 5

Doorarka Taageerada ..... 6

Nidaamyada Khadka Tooska ah ee Loo Adeegsado Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ..... 7

Dhammaystirka Qaybaha Aqoonsashada Tayada ..... 7

Ayaa la heli karaa laga bilaabo Luulyo 2026: ..... 7

Soo Socda Dhawaan ..... 8

Barnaamijyada Habka LOVIT ..... 8

Tallaabooyinka Wareegga Aqoonsashada Tayada ee loogu talagalay Goobaha Magacaabista ..... 8

Dhammaystirka Magacaabista ..... 11

Shuruudaha Heerka Tayada, Tababarka iyo Dukumiintiyada ..... 11

Shahaadada Dhammaystirka ..... 12

Dib-u-Cusboonaysiinta Magacaabista ..... 13

Fursadaha Maalgalinta ..... 13

Abaalmarinnada Maalgelinta Luuqadaha Labada Dhinaca ah ..... 13

## TILMAAMAHA HIRGELINTA MAGACAABISTA LUUQADAHA LABADA DHINACA AH

Qaddarrada Abaalmarinta Maalgelinta Luuqadaha Labada Dhinaca ah ........ 14
Ogeysiiska U-qalmitaanka ........ 14
Isticmaalka La Oggol Yahay ee Maalgelinta ........ 14
Shuruudaha iyo Xaaladaha ........ 14
Su'aalo ........ 15

Waaxda Carruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska (Department of Children, Youth and Families, DCYF) kuma takoorto oo waxay bixisaa helitaan loo siman yahay barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda dadka oo dhan iyada oo aan loo eegin isir, midab, jinsiga, diin, caqiido, xaalada guurka, wadanka u dhalasho, muwaadinimada ama heerka socdaalka, da'da, dookha galmada ama aqoonsiga jinsiga, ciidanimo, ama heerka milatariga, heerka hooyo naas nuujinaysa, iyo joogitaanka naafo jidh, dareen, ama maskaxeed kasta ama isticmaalka hagaha eyga ama xayawaanka dadka u adeega. Haddii aad jeclaan lahayd nuqulo daabacaadan ah oo bilaash ah oo qaab ama luqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Cilaaqaadka Xubnaha (DCYF Constituent Relations) 1-800-723-4831 ama iimayl u dir communications@dcyf.wa.gov.

# Hordhac

## Ujeedada Tilmaamaha Hirgelinta Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca Ah

Tilmaamahan ayaa ka caawinayaa barnaamijyada waxbarashada carruurnimada ka hor inay fahmaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah oo ay dhammaystiraan hanaanka magacaabista.

Isticmaal tilmaamahan:

- Baro waxa ay tahay Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah
- Faham shuruudaha lagu heli karo magacaabista
- Raac tallaabo kasta oo ka mid ah hanaanka magacaabista
- Hel macluumaad iyo agabyo inta lagu gudo jiro hanaanka

**Ma u baahan tahay caawimo?** Wixii su'aalo oo ku saabsan hanaanka Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah, fadlan kala xiriir bogeeda DCYF QRIS@dcyf.wa.gov

## Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca Ah

Xeerka Bilowga Caddaaladda ah ee loogu talagalay Carruurta (The Fair Start for Kids Act) ayaa sameeysay Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah. Magacaabistani waxay aqoonsanaysaa barnaamijyada taageera carruurta wax ku baranaysa labo luqad ama wax ka badan, kuwaas oo buuxiya shuruudaha Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

**Barnaamijyadu waa inay ka qaybqaataan:**

- Early Achievers

**Waa maxay macnaha magacaabista:**

- Waxay aqoonsansataa barnaamijyada taageera carruurta iyo qoysaska ku hadla luuqadaha Labada Dhinaca ah
- Waxay aqoonsansataa barnaamijyada ka shaqeeya xoojinta iyo dib-u-soo nooleynta luuqadaha Qabaa'ilka
- Waxay muujisaa in barnaamijku isticmaalo hab-dhaqanno taageera waxbarashada luuqadaha Labada Dhinaca ah

## Noocyada Barnaamijyada U Qalma Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah

**Barnaamijyada Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah**

Barnaamijyada luuqadaha Labada Dhinaca ah waxay waxbarashada ku bixiyaan laba luuqadood, badanaa Ingiriisi iyo luuqad ay bulshada ku hadasho. Ugu yaraan **50%** waxbarashada waxaa lagu bixiyaa luuqadda kale ee barnaamijku kaashado. Luuqad kasta si ula kac ah ayaa loo isticmaalaa inta lagu jiro magacaabista, isle'eg, oo si joogto ah loo sahmin karo. Habkani wuxuu taageeraa **laba-luqadeynta**, **akhris-qoraalka laba luqadood**, iyo xiriirro xooggan oo **dhaqameed iyo qoys**.

## TILMAAMAHA HIRGELINTA MAGACAABISTA LUUQADAHA LABADA DHINACA AH

Carruurta ku jirta barnaamijyadan waxay bartaan:

- Sida wax loogu akhriyo looguna qoro luuqadda kaashiga
- Casharrada iyo dhaqammada dhaqanka
- Maaddooyinka waxbarashada dugsiga oo lagu barto labada luuqadood

**Barnaamijyada Dib-u-soo Noolaynta Luuqadaha Qabaa'ilka**

Barnaamijyada dib-u-soo-nooleynta luuqadaha Qabaa'ilka waxay caawiyaan ilaalinta iyo xoojinta luuqadaha Qabaa'ilka. Barnaamijyadan waxaa hagaya waxbarista dhaqanka iyo aqoonta dhaqameed ee jiilba jiilka kale loo soo gudbiyey.

Barnaamijyadani waxay raacaan hababka ay Qabaa'ilku qeexeen, mana aha nidaamka luuqadaha ee boqoleyda 50/50 ah.

### Hay'ado dhowr ah ayaa si wadajir ah uga shaqeeya taageeridda Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

**DCYF**

Ayaa hoggaamisa qorshaynta, horumarinta, hirgelinta iyo kormeerka hanaanka magacaabista, waxayna bixisaa awaal-marin marka dhammaan shuruudaha magacaabista la buuxiyo. Ayaa si wadajir ah Hay'adda Wacyigelinta Daryeelka Carruurta ee Washington (Child Care Aware of Washington) iyo Jaamacadda Washington (University of Washington, UW) Cultivate Learning u horumarisa agabyada waxbarashada.

**UW Cultivate Learning**

Ayaa dib u eegtaa caddaymaha la soo gudbiyey inta lagu jiro wareegga aqoonsashada tayada. Ayaa cusboonaysiinaysa Is-dhexgalka Bulshada iyo Barayaasha Tababaraha (Coach and Educator Community Interface, CECI) si ay u taageerto habka magacaabista, oo ayna tababar u siiso tababarayaasha Horumarleyda Hore (Early Achievers).

**Child Care Aware of Washington (CCA ee WA)**

Ayaa bixiso taageerada tababbarida barnaamijyada kuwaas oo ka qaybqaadanaya dadaallada waxbarashada luuqadaha Labada Dhinaca ah ama dib-u-soo-nooleynta luuqadaha Qabaa'ilka.

**Ka-qaybgalayaasha Early Achievers**

Ayaa Dhammaystira tallaabooyinka loo baahan yahay ee hanaanka Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah oo qayb ka ah Wareeggooda Aqoonsashada Tayada.

## Qaab-dhismeedka Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah

### Guudmar

Ka-qaybgalayaasha Early Achievers ayaa heli karaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah iyaga oo u maraya Wareegga Aqoonsashada Tayada.

Si ay u helaan magacaabista, barnaamijyadu waa inay soo gudbiyaan caddaymo muujinaya sida ay u buuxiyaan Heerarka Barnaamijyada Luuqadaha Labada Dhinaca ah iyo Hab-dhaqannada Ugu Fiican.

**Heerarka Barnaamijyada Luuqadaha Labada Dhinaca ah ee Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurnimada Ka Ho** ayaa bixiso qaab-dhismeed ku salaysan cilmi-baaris oo ka kooban hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee lagu aqoonsado, lagu horumariyo, laguna wanaajiyo barashada luuqadaha badan ee goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada ka hor.

**Qaybaha Heerarka Tayada:**

Barnaamijyada waxay soo gudbiyaan caddaymo ku saabsan shan qaybood oo ka mid ah heerarka tayada:

- Manhajka iyo Qiimaynta
- Qaab-dhismeedka Barnaamijka
- Ka-mid-noqoshada Dhaqanka
- Ka-qaybgalka Qoyska iyo Iskaashatada Bulshada
- Tilmaamaha Luuqadda iyo Dhaqanka Qabaa'ilka

**Ma rabtaa inaad wax badan barato? Dib u eeg agabka soo socda:** Heerarka Barnaamijyada Luuqadaha Labada Dhinaca ah ee loogu talagalay Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurnimada Ka Hor.

## Bilaabanaya

Habka Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ee guuleysta wuxuu ka bilaabmaa fahamka shuruudaha iyo taageerada la heli karo. Qaybtani waxay sharxaysaa cidda codsan karta, sida loo bilaabo, iyo halka laga heli karo caawimaad.

### Yaa Codsan Kara Magacaabista?

Ka-qaybgalayaasha Early Achievers ee bixiya barnaamijyada Luuqadaha Badan ama Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabaa'ilka ayaa codsan karaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah iyaga oo raacaya habka Wareegga Aqoonsashada Tayada ee Early Achievers.

Kaqaybgalku waa ikhtiyaar. Barnaamijyada doorta inay codsadaan waa inay buuxiyaan shuruudaha u-qalmitaanka oo ay dhammaystiraan dhammaan tallaabooyinka loo baahan yahay.

### Shuruudaha U-qalmitaanka

Si uu barnaamijku u helo Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah, waa inuu:

- Noqdaa goob ka tirsan Early Achievers oo leh Heer Tayo oo 3+ ama ka sarreeya oo la dhammaystiray.

- Ku taxaa luuqadaha barnaamijka buugga-yaraha siyaasadaha oo sharax sida barnaamijku uu u kaashado qoysaska si uu u daboolo baahiyaha carruurta barta luuqadaha Labada Dhinaca ah, ama qeex sida dadka ku hadla luuqadaha Qabaa'ilku ay uga qaybqaataan dib-u-soo-nooleynta luuqadda.
- Haystaa shaqaale waxbarashada ku bixiya Ingiriisi iyo luuqadda kale ee barnaamijka, ama noqda barnaamij Dib-u-soo-nooleynta Luuqadda Qabaa'ilka ah oo leh qof la aqoonsan yahay oo ku hadla luuqadda Qabaa'ilka.
- Hubiyaa in dhammaan macallimiinta hoggaanka u ah barnaamijka Luuqadaha Labada Dhinaca ah iyo hoggaamiyeyaasha barnaamijku ay dhammaystiraan tababarka Luuqadaha Badan. (Barnaamijyada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabaa'ilka waa laga dhaafay) Soo gudbinta caddaymo muujinaya sida barnaamijkaagu u buuxiyo Heerarka Barnaamijyada Luuqadaha Labada Dhinaca ah iyo Hab-dhaqannada Ugu Fiican.

## Doorarka Taageerada

**Tababarayaasha Early Achievers**

Maadaama Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ay qayb ka tahay Early Achievers, tababarayaashu waxay ka caawin karaan barnaamijyada inta lagu gudo jiro hanaanka.

Tababarayaashu waxay:

- Ka caawin karaan inaad fahanto shuruudaha barnaamijyada magacaabista.
- Ka caawin karaan bixiyeyaasha adeegga inay helaan hanaanka codsashada magacaabista ee CECI.
- Kugu xiriirin karaan agabyada barnaamijyada, qalabyo iyo fursado horumarinta xirfadeed.
- La wadaagi karaan macluumaad ku saabsan Heerarka Luuqadaha Labada Dhinaca ah, hab-dhaqannada ugu wanaagsan, shuruudaha u-qalmitaanka iyo jadwalka waqtiyeed.
- Kugu xiriiirin karaan bixiyeyaasha adeegga DCYF marka loo baahdo hagitaan dheeraad ah.

Fadlan su'aalaha ku soo dir iimaylka QRIS@dcyf.wa.gov.

**Xiriiriyeyaasha Bulshada ee Cultivate Learning**
Xiriiriyeyaasha Bulshada ee Cultivate Learning (Community Liaisons, CLs) waxay la shaqeeyaan ka-qaybgalayaasha Early Achievers iyo tababarayaasha inta lagu gudo jiro Wareegga Aqoonsashada Tayada.

Waxay ka caawiyaan barnaamijyada:

- Inay fahmaan hanaanka.
- Inay diyaariyaan agabyada loo baahan yahay.
- Inay dhammaystiraan tallaabo kasta oo ka mid ah Wareegga Aqoonsashada Tayada.
- Inay heli karaan taageero iyo hagitaan marka loo baahdo.

## Nidaamyada Khadka Tooska ah ee Loo Adeegsado Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah

**MERIT**

Qalabka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada iyo Diiwaangelinta (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) waa nidaamka Washington ee lagula socdo xirfadlayaasha waxbarashada carruurnimada ka hor iyo ka-qaybgalka Early Achievers.

MERIT gudaheeda, barnaamijyadu waxaa:

- Soo gudbin kara codsiga wixii Aqoonsashada Tayada leh (Request for Quality Recognition, ReQR) si ay u bilaabaan Wareegga Aqoonsashada Tayada.
- La socon kara tababarka Luuqadaha Labada Dhinaca ah ee loo baahan yahay kaas oo dhammaystiray shaqaalaha hoggaanka iyo hoggaamiyeyaasha barnaamijka.
- Dhammaystiri kara Heerka Tayada.

**Is-dhexgalka Bulshada ee Tababarayaasha iyo Barayaasha (CECI)**

**CECI** waa aaladda khadka tooska ah ee Washington ee tababarka iyo aqoonsiga tayada.

Barnaamijyadu waxay CECI u isticmaalaan inay:

- Dhammaystiraan shuruudaha Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah
- Soo gudbiyaan agabyada loo baahan yahay
- La socdaan horumarka
- Ka qaybqaataan hanaanka Aqoonsashada Tayada

## Dhammaystirka Qaybaha Aqoonsashada Tayada

Barnaamijyadu waxay isticmaalaan qaybaha soo socda ee Early Achievers si ay u muujiyaan sida ay u taageeraan barashada Luuqadaha Labada Dhinaca ah iyo dib-u-soo-nooleynta Luuqadaha Qabaa'ilka:

- **Muunada barnaamijka**
- **Tallooyinka Tilmaamta Muuqaalka**
- **Dib-u-eegista Diiwaanada**

Qaybaha dheeraadka ah oo ku saabsan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ayaa lagu dari doonaa sannadka 2027, waxaana tilmaamaha la cusboonaysiiyey la bixin doonaa ka hor inta aan la hirgelin.

## Ayaa la heli karaa laga bilaabo Luulyo 2026:

Laga bilaabo Luulyo 2026, barnaamijyadu waa inay dhammaystiraan shuruudaha soo socda:

- Dhammaystiraan **Astaanta Barnaamijka**

- Soo gudbiyaan hal **Muuqaal Muujinaya Qodobbada Muhiimka ah (Video Highlight)** oo Ingiriisi ah iyo hal muuqaal oo ku qoran luuqadda kale ee barnaamijka ee fasal kasta oo Luuqadaha Labada Dhinaca ah ka hor inta aadan codsan Heerka Aqoonsashada Tayada
- Buuxiyaan Heerarka 1, 2, iyo 3 ee **Adkaynta Qoysaska iyo Taageeridda Qoysaska**

**Tallooyinka Tilmaamta Muuqaalka**
Muuqaallada ugu muhiimsan ee Fiidiyowyada waa soo gudbinno muuqaallo gaagaaban oo muujinaya isdhexgal macno leh oo u dhexeeya barayaasha iyo ilmaha. Soo gudbin kasta waxaa ku jira cashar ama waxqabad la qorsheeyay, duubitaan ku saabsan isdhexgalka, iyo milicsi qoraal ah. Muuqaallada muhiimka ah waxay muujinayaan sida carruurtu ula kulmaan luqadda **Ingiriisiga** iyo **luqadda kula shirkadda ah** ee goobaha fasallada labada-luuqad loogu hadla.

**Ma rabtaa inaad wax badan barato?** Booqo Warqadda Xogta ee Muuqaallada Muhiimka ah (Video Highlights Factsheet)

## Soo Socda Dhawaan

Qaybo dheeraad ah ayaa lagu dari doonaa sannadka 2027. DCYF ayaa bixin doontaa macluumaad dheeraad ah iyo hagitaan la cusboonaysiiyey ka hor inta aan la hirgelin.

**Fiiro gaar ah:** *DCYF ayaa u cusboonaysiin doontaa qaybtan marka macluumaad cusub la helo.*

## Barnaamijyada Habka LOVIT

Barnaamijyada Qabaa'ilka ayaa lagu heli karaa iyada oo loo maraayo Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah midkood:

- Hanaanka heeraysan ee Aqoonsashada Tayada ee Early Achievers ama,
- Hanaanka Qiimaynta Barnaamijka (Program Evaluation Process, PEP) ee Habka Barashada U fiirsashada, Qiimaynta, Dhiirrigelinta iyo Isbeddelka (Learning to Observe, Value, Inspire and Transform Way, LOVIT Way).

Labada ikhtiyaarba waxay taageeraan horumarinta tayada ee joogtada ah, waxayna ixtiraamaan hab-dhaqannada dhaqan ahaan salka ku haya ee barnaamijyada Qabaa'ilka.

Shuruudaha marka la adeegsanayo HABKA LOVIT waa inay:

- Ka qaybqaataan Hanaanka Qiimaynta Barnaamijka (PEP) ee qof ahaan loo qabto.
- Dhammaystiraan fasal kasta ugu yaraan hal qorshe hawleed oo ku saabsan luuqadda Qabaa'ilka.
- Dhammaystiraan hal qorshe hawleed oo Habka LOVIT ah oo diiradda saaraya ka-qaybgalka qoyska, taas oo qayb ka ah hanaanka is-qiimaynta Adkaynta Qoysaska.

## Tallaabooyinka Wareegga Aqoonsashada Tayada ee loogu talagalay Goobaha Magacaabista

1. **Soo Gudbi Codsiga loogu talagalay Aqoonsashada Tayada (ReQR)**

**Loo baahan yahay:** Haa

**Halka lagu dhammaystiro:** MERIT

Ka hor inta aadan soo gudbin, barnaamijyada waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay la xiriiraan adeegyada tababarka ee deegaanka.

Soo gudbinta codsiga ReQR:

- Calaamadaha muujinaya diyaar-garowga lagu bilaabayo Wareegga Aqoonsashada Tayada.
- Waxay furaytaa helitaan lagu dhammaystiro qaybaha loo baahan yahay ee Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

**2. Dhammaystiraan Astaanta Barnaamijka**

**Loo baahan yahay:** Haa

**Halka lagu dhammaystiro:** CECI

Astaanta Barnaamijku waa qalab is-milicsi ah oo ka caawiya barnaamijyada inay aqoonsadaan meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo yoolalkooda.

Astaanta barnaamijka:

- Waa in la dhammaystiraa ka hor qaybaha kale.
- Waxa ku jira sahano ay dhammaystireen maamulayaasha, shaqaalaha hormuudka ah, iyo qoysaska.
- Waxay isticmaashaa Astaanta Barnaamijka ee heeraysan ee Early Achievers, taas oo loogu talagalay codsadayaasha Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

**3. La samee Tababaraha Qorshaha Horumarinta Tayada (Quality Improvement Plan, QIP)**

**Loo baahan yahay:** Haa

**Halka lagu dhammaystiro:** CECI

Barnaamijyadu waxay sameeyaan Qorshaha Horumarinta Tayada iyagoo taageero ka helaya tababare.

QIP-ga:

- Wuxuu ka isticmaalaa macluumaadka Astaanta Barnaamijka.
- Wuxuu aqoonsadaa meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha u baahan horumar.
- Wuxuu dejiyaa yoolal loogu talagalay horumarinta tayada ee joogtada ah.
- Wuxuu hagaa inta ka hartay Wareegga Aqoonsashada Tayada.

**4. Tallooyinka Tilmaamta Muuqaalka**

**Loo baahan yahay:** Haa

**Halka lagu dhammaystiro:** CECI

Muuqaallada Muhiimka ah waxaa ku jira muuqaallo gaagaaban kuwaas oo muujinaya is-dhexgal tayo sare leh oo ka dhaca goobaha waxbarashada.

Shuruudaha:

- Soo gudbi ugu yaraan laba iyo ugu badnaan lix qaybood oo muuqaallo ah kuwaas oo muujinaya goobo waxbarasho oo tayo sare leh.
- Muuqaallada waxaa dib-u-eegay Khubarada Aqoonsashada Tayada iyagoo adeegsanaya Is-dhexgalka Tayada Leh ee Gudaha Daryeelka Carruurta (Quality Interactions in Child Care, QUIC).
- Fasal kasta oo Luuqadaha Labada Dhinaca ah waa inuu soo gudbiyaa:
    - Hal Muuqaal Muujinaya Qodobbada Muhiimka ah oo ku baxaya Ingiriisi ah
    - Hal Muuqaal Muujinaya Qodobbada Muhiimka ah oo ku baxaya luuqadda kale ee barnaamijka
- Fasallada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadda Qabaa'ilka:
    - Booqo Warqadda Xogta ee Muuqaallada Muhiimka ah si aad u hesho hagitaan dheeraad ah (Link)

**5. Soo Gudbi Dib-u-eegista Diiwaannada**

**Loo baahan yahay:** Haa, wixii Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Carruurnimada Ka Hor ah (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) Haa, wixii Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

**Halka lagu dhammaystiro:** CECI

Dib-u-eegista Diiwaannadu waxay ka kooban tahay dukumiintiyo muujinaya sida barnaamijku u buuxiyo heerar tayo oo gaar ah.

Barnaamijyada waa inay:

- Soo gudbiyaan dukumiinti muujinaya hab-dhaqannada hadda jira.
- Dhammaystiraan dhammaan shuruudaha Dib-u-eegista Diiwaannada ee la xiriira Heerarka Barnaamijyada Luuqadaha Labada Dhinaca ah.
- Buuxiyaan Heerarka 1, 2, iyo 3 ee Adkaynta Qoysaska iyo Taageeridda Qoysaska.

**Fiiro gaar ah:** Barnaamijyadu waa inay buuxiyaan shuruudaha Dib-u-eegista Diiwaannada si ay u helaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

**6. Gudbi Caddeynta Aqoonsiga**

**Loo baahan yahay:** Ikhtiyaari

**Halka lagu dhammaystiro:** CECI

Barnaamijyadu waxay soo gudbin karaan caddaynta aqoonsiga hay'adaha (accreditation) taas oo buuxisa shuruudaha u-qalmitaanka si ay u helaan dhibco aqoonsi oo dheeraad ah.

7. **Soo Gudbi Caddeynta Horumarinta Xirfadeed (Professional Development, PD)**

**Loo baahan yahay:** Ikhtiyaari

**Halka lagu dhammaystiro:** MERIT

Dhibcaha Horumarinta Xirfadeed waxay ku salaysan yihiin waxbarashada shaqaalaha ee la xaqiijiyey oo lagu diiwaangeliyey MERIT.

Macluumaad muhiim ah:

- Dhibcaha waxaa lagu dabaqaa oo keliya marka dhammaan qaybaha loo baahan yahay la dhammaystiro.
- Barnaamijyadu waxay dhibcaha horudhac ah uga arki karaan qaybta Qaab-dhismeedka Tayada ee MERIT, gudaha Xarunta/Goobta Astaanta.
- Dhibcaha si toos ah ayaa loo xisaabiyaa marka la dhammaystiro Heerka Tayada.

8. **Dhammaystir Heerka Tayada**

**Loo baahan yahay:** Haa

**Halka lagu dhammaystiro:** MERIT

Si loo dhammaystiro Heerka Tayada:

- Soo gudbi codsi adigoo adeegsanaya qaybta Qaab-dhismeedka Tayada (Quality Framework tab) ee MERIT, gudaha Xarunta/Goobta Astaanta.
- MERIT ayaa si otomaatig ah u dhammaystirta Heerka Tayada marka taariikhda kama-dambaysta ah ee loogu talagalay ka-qaybgaluhu ay gaarto.

Dhammaystirka Heerka Tayada:

- Waxay soo afjartaa Wareegga Aqoonsashada Tayada.
- Waxay xaqiijisaa Heerka Tayada ee ugu dambeeysa ee barnaamijka.
- Wuxuu u bahan yahay **Heer Tayo oo 3+ ama ka sarreeya** oo la dhammaystiray si loo helo Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

## Dhammaystirka Magacaabista

### Shuruudaha Heerka Tayada, Tababarka iyo Dukumiintiyada

Si ay u helaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah, barnaamijyadu waa inay dhammaystiraan dhammaan qaybaha iyo tababarrada loo baahan yahay inta lagu gudo jiro Wareegga Aqoonsashada Tayada ee Early Achievers.

**Ka hor inta aadan Dhammaystirin Heerka Tayadaada:**

Hubi in barnaamijkaagu uu dhammaystiran yahay dhammaan waxyaabaha soo socda:

- Dhammaan Qaybaha Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

- Buug-yaraha siyaasadaha kaas oo:
    - Taxaya luuqadaha lagu isticmaalo barnaamijka.
    - Sharaxaya sida barnaamijku ula shaqeeyo qoysaska si looga taageero carruurta ku hadasha luuqadaha Labada Dhinaca ah.
    - Ama, barnaamijyada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadda Qabaa'ilka, ayaa qeexaya sida dadka ku hadla luuqadda Qabaa'ilku u taageeraan dib-u-soo-nooleynta luuqadda.
- Hubinaya in shaqaalaha hoggaanka Luuqadaha Badan iyo hoggaamiyeyaasha barnaamijku ay dhammaystiraan Tababarka Luuqadaha Labada Dhinaca ah ee DCYF.
    - Barnaamijyadu waxay buuxin karaan shuruudda tababarka iyagoo dhammaystiraya mid ka mid ah kuwan soo socda:
        - *Bartayaasha Luuqadaha Labada Dhinaca ah: Tababarka loogu talagalay Xirfadlayaasha Waxbarashada Carruurnimada Ka Hor*
        - *Barashada Luuqadaha Labada Dhinaca ah ee Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurnimada Ka Hor*

  Tababarka waa in lagu diiwaangeliyaa Diiwaanka Xirfadeed ee qofka ee MERIT ka hor inta aanu barnaamijku dhammaystirin Heerka Tayadiisa.

  **Fiiro gaar ah:** Barnaamijyada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadda Qabaa'ilka waa laga dhaafay.

**Ma u baahan tahay caawimaada helidda tababarka?** Waxaad ka raadin kartaa tababar gaar ah adigoo adeegsanaya qalabka raadinta ee MERIT.

- **Shuruudaha Heerka Tayada**
    - Si ay u helaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah, barnaamijyadu waa inay gaaraan Heer **Tayo oo 3+** ama ka sarreeya inta lagu gudo jiro Wareegga Aqoonsashada Tayada ee Early Achievers.

## Shahaadada Dhammaystirka

Marka DCYF ay xaqiijiso ka dib in barnaamijku buuxiyey dhammaan shuruudaha Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah, barnaamijku wuxuu heli doonaa:

- Iimayl xaqiijin ah, iyo
- Shahaado rasmi ah oo Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

DCYF waxay kugu soo diri doontaa kuwan muddo **60 maalmood** gudahood ah marka barnaamijku dhammaystiro Heerka Tayada ka dib. Shahaadadani waxay xaqiijinaysaa heerka magacaabista ee barnaamijka.

**Fiiro Gaar oo Muhiim ah:** Shahaadada Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah waxay ka duwan tahay shahaadada Heerka Tayada ee Early Achievers, mana la beddeli karo.

### Dib-u-Cusboonaysiinta Magacaabista

Barnaamijyadu waa inay dib-u-cusboonaysiiyaa Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah **saddexdii sanoba mar.**

Si dib-loogu-cusboonaysiiyo, barnaamijyadu waa inay:

- Dhammaystiraan Wareeg cusub oo Aqoonsashada Tayada ee Early Achievers
- Dhammaystiraan dhammaan qaybaha loo baahan yahay ee Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.
- Soo gudbiyaan caddaymaha la cusboonaysiiyey.
- Dhammaystiraan **Heer Tayo oo 3+** ama ka sarreeya oo cusub.

Jadwalka dib-u-cusboonaysiinta wuxuu raacayaa wareegga Heerka Tayada ee Early Achievers ee barnaamijka.

Si ay u sii haystaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ee firfircoon, barnaamijyadu waa inay:

- Dhammaystir Heer Tayo oo Cusub
- Sii hayaan ugu yaraan Heer Tayo oo 3+ ah
- Dhammaystiraan dhammaan qaybaha loo baahan yahay ee Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah **ka hor inta uusan dhicin Heerka Tayada iyo heerka magacaabista ee hadda jira.**

## Fursadaha Maalgalinta

### Abaalmarinnada Maalgelinta Luuqadaha Labada Dhinaca ah

Barnaamijyada hela Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah waxay u qalmi karaan Abaalmarinta Maalgelinta Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

Si ay ugu qalmaan, barnaamijyadu waa inay:

- Helaan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah
- Gaaraan oo helaan **Heer Tayo oo 3+** ama ka sarreeya
- U adeegaan carruurta hela kaalmada daryeelka carruurta ee gobolka ama bixiyaan adeegyada ECEAP

Barnaamijyadu sidoo kale waa inay:

- Loo Shatiyeeyay, loo shahaadeeyey, ama loo shahaadeeyey oo keliya u-qalmitaanka lacag-bixinta.

Iyo inay buuxiyaan mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Ay dalbadeen oo ay heleen lacag-bixin kaalmada ah 12 bilood gudahood ka hor inta aan la dhammaystirin magacaabista.

AMA

- Bixiyaan adeegyada Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Carruurnimada Ka Hor (ECEAP).

## Qaddarrada Abaalmarinta Maalgelinta Luuqadaha Labada Dhinaca ah

Abaalmarinnada maalgelinta waxaa goob kasta si gaar ah loogu siiyaa barnaamijyada u qalma kuwaas oo dhammaystiray Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah. Qaddarrada Abaalmarintu waa:

- Barnaamijyada Luuqadaha Labada Dhinaca ah waxay heli karaan **$2,100 goob kasta**.
- Barnaamijyada Dib-u-soo-nooleynta Luuqadda Qabaa'ilka waxay heli karaan **$2,500 goob kasta.**

**Fiiro gaar ah:** Maalgelintu waxay ku xiran tahay helitaanka dhaqaalaha.

## Ogeysiiska U-qalmitaanka

DCYF ayaa soo diri doontaa iimayl oo ku jiro go'aanka u-qalmitaanka maalgelinta qiyaastii **60 maalmood oo taariikheed** barnaamijku ka dib:

- Dhammaystirtaa Heerka Tayadeeda, iyo
- Helaa Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah.

## Isticmaalka La Oggol Yahay ee Maalgelinta

Barnaamijyadu waxay maalgelinta u isticmaali karaan taageeridda deegaannada waxbarashada luuqadaha Labada Dhinaca ah.

Kharashaadka la oggol yahay waxaa ka mid ah:

- Mushaharka shaqaalaha kaas bixiya waxbarashada laba-luqadlaha ah
- Tababarka shaqaalaha iyo horumarinta xirfadeed, oo ay ku jiraan:
- Qorsheynta ku dhex jirta shaqada
- Beddelka shaqaalaha ee waqtiga qorsheynta
- Waqti mushahar leh oo lagu xaadiriyo horumarinta xirfadeed
- Manhaj ku habboon dhaqanka iyo luuqadda
- Agabyada waxbarashada
- Kharashaadka kale ee la xiriira barnaamijka Luuqadaha Labada Dhinaca ah

## Shuruudaha iyo Xaaladaha

Barnaamijyada hela maalgelinta waa inay:

1. Lacagta u isticmaalaan oo keliya ujeeddooyinka la oggolaaday.
2. Hayaan rasiidhada iyo diiwaannada taageeraya muddo toddoba sano ah.
3. Soo gudbiyaan rasiidaha ama dukumiintiyada haddii la weydiisto.

**Muhiim ah:** Barnaamijyada waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay dib u bixiyaan maalgelinta haddii aysan soo gudbin karin dukumiinti muujinaya sida lacagaha loo isticmaalay.

## Su'aalo

Wixii su'aalo oo ku saabsan Magacaabista Luuqadaha Labada Dhinaca ah ama Abaalmarinta Maalgelinta Luuqadaha Labada Dhinaca ah, kala xiriir QRIS@dcyf.wa.gov.